



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 1, 2022

Ku socota: Dadka reer Oregon ee qaba I/DD iyo qoysaskooda (CME-yada, Hawl-wadaagayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha, fadlan macluumaadkani la wadaaga dadka aad u adeegtaan.)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Hordhaca tababarka Compass Project

Fadlan akhri farriintani ku saabsan tababar muhiim ah oo loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), qoysaskooda iyo mas'uuliyiintooda.

Compass Project ayaa hore u sii socda si uu adeegyada I/DD ee Oregon uga dhigo mid si dheeraad ah qofka diiradda u saara, kala cad oo si sahlan loo fahmo. ODDS ayaa ku hawlan in uu nidaamka ka dhigo mid xataa si dheeraad ah diiradda u saara waxa dadku u baahan yihiin noloshooda iyada oo lagu saleynayso baahiyahooda, waxyaabaha ay daneynayaan iyo waxyaabaha ay doorbidayaan.

ODDS waxay qabanaysaa tababarka "Compass Overview" si loo caawiyo dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD), qoysaskooda iyo mas'uuliyiintooda si ay si wanaagsan ugu fahmaan qaybaha muhiimka ah ee Compass Project. Kuwaasi waxaa ka mid ah Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon (ONA), wax iska reebida, kooxaha adeega iyo waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan sida mashruucu u saameyn doono dadka hela adeegyada iyo qoysaskooda. Fadlan la soo qayb gal.



Goorta: 6 ilaa 7:30 galabnimo Maarso 16, 2022

Dhageystayaasha: Dadka hela adeegyada I/DD ee ku nool Oregon iyo qoysaskooda

Goobta: Kulamada waxaa la qaban doonaa Zoom. Fadlan isticmaal meeshan laga sii gelayo — <https://bit.ly/3JQ2CLi> — ama astaanta QR ee ku taala bidixda si aad ugu soo biirto kulamada Maarso 16.

Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii qorsheeyo, fadlan Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811 ama DD.DirectorsOffice@dhsosha.state.or.us. Codsiyada waa in lagu sameeyaa ugu yaraan saddex maalmo shaqo ka hor kulanka. Turjumaada Luqadda Dadka aan wax Maqli karin ee Maraykanka iyo Helitaanka Wada xiriir Waqti-Dhab ah (CART) oo hadalka qoraal ah 'captioning' ayaa la bixin doonaa.

Fadlan macluumaadkani la wadaaga dadka aad taqaanaan ee hela adeegyada ee ka tirsan nidaamka I/DD ee Oregon. Kooxda Compass Project ayaaa bixin doona tababarkani oo siin doona waqti loogu talagalay su'aalaha iyo wada hadalka. Waxaan rajeynaynaa in aan halkaasi kugu aragno.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.